



Region
Gävleborg

Dhacdoonka waaxda qalliinka waa sidatan

KU SOO-DHOWOO WAAXDA QALLIINKA

Qoraal-warbixineedkaan waxaa ku qoran warbixin kooban ku saabsan dhacdoonka xilliga aad waaxda ku sugaran tahay.

Waxaan ogsoon nahay jiritaanka walwalka laga qabo qalliinka iyo suuxinta ba.

Waxaan aaminsan nahay inaad aammaan dareemi doonto haddii lagu siiyo warbixin xiriir la leh dhacdoonka inta lagu guda jiro qalliinka iyo masawirrada muqalka waaxda.

RAASHIIN KA SOOMIDA

Ugu yaraan lex saacadood ka hor maalinta qallinka waa inaadan wax raashin ah cunin. Cabbitaan biyo-biyo ah (ugu badnaantii 200 ml) ayaa cabbi kartaa ilaa laba saacadood qallinka kahor. Cabbitaanka biyo-biyo ah waxaa kamid ah biyaha, sharbeed, shaah iyo qaxwo oo aan caano lahayn. Casiirka ma ahan cabbitaan biyo-biyo ah. Waa inaad sidoo kale iska ilaalisaa calaashashada xanjada, kiniinka cunaha ee lozenges iyo buuriga.

Haddii warbixin kale aan lagu siin waa inaad waxba aadan cunin wixii ka dambeeyaa markii saacadda ay ku beegan tahay 24.00 habeenimo. Haddii kale wixii caloosha ku jiray waxay inta lagu guda jiro qalliinka ku soo daadanayaan sambabaha.

Sidaas awgeed, waxaanu doonaynaa inaad calooshaada soo faaruqisay intii aan ku suuxinin kahor, haddii kale dhawaac culus ayuu sambabaha u geysan karaan.

Waa muhim inaad hab-dhaqankaan tixgeliso oo aad halis isku keenin markii lagu suuxinaayo. Haddii aadan nidaamkan tixgelin karin dib ayaa qalliinka loo dhigi doonaa.

Ugu yaraan lex toddobaad/isbuuc kahor maalinta qallinka waa inaad aadan wax sigaar ah cabbin.

IS-DIYAARINTA NADAFAAD-SHAQSIYEEDKA KU SALAYSAN
Qallinka ka hor waa inaad soo qubeysataa oona timahaaga soo dhaqda adigoo adeegsanaayo saabuun gaar ah oo farmashiyada laga soo iibsado, taasoo warqadda yeeritaanka ku qoran. Tixraac hab isticmaalka baakada ku qoran. Qubey-sashada iyo dhaqida timaha iyadoo saabuun gaar ah la adeegsanaayo waa muhim, maxaayeelay waxay ka badbaadi doonaan bakteeriyaasha maqaarka ku nool. Maqaarka qof kasta waxaa ku nool baakteeriyaal oo aan halis ahayn, laakinse haddii inta lagu guda jiro qalliinka ay helaan fursad ay u soo gudbaan jirka gudahiisa waxay sababaan infeekshanno. Waa in rinjiga ciddiyaha laga tirtira, laga saara ciddiyaha aan caadiga ahayn, waxyaalaha jirka lagu



qurxiyo iyo biraha, dahabka iwm. Gadalka wayni waxa uu leeyahay khatar la xidhiidha suuxdinta. Waxaanu doonaynaa inaad gadalka soo gaabiso.

DAAWOOYINKA

Nooca daawooyinka oo aad u bahan tahay inaad qaadato maalinta qallinka waxaa ku wargelin doono takhtarka suuxinta ama kalkaalisada suuxinta.

Qolka diyaargaroowga – qolka qallinka lagu sugo

QALLINKA KAHOR WAXAAD KU HAKAN DOONTAA QOL WAAXDA QALLINKA KU YAALLO. ISLA QOLKAAS WAXAA KU SUGAN DADYOOW KALE OO IYAGANA QALLIN SUGAAYO

Halkaas ayaa adiga iyo hawladeeyaasha qallinka ku kulmi doontaan kaddib su'aallo ayay ku waydiin doonaan: kuwaasoo kamid ah: tobban lambar ee aqoonsiga, goorta ugu dambeeysay oo aad wax cuntay ama cabtay, jirrooyinka kale ee aad

qabto, waxyaalaha oo aad u adkaysan karin, iyo haddii hadda kahor lagu suuxiyay.

Waxaan kaloo hubsanaynaa in takhtarka ku qalli doonoo u calaamadaysaty halka jirka u ka qalli doono. Laakinse waa tilaaboo mar kasta aan la qaadin.

Waxaa dhici karto in dad kala duwan ay isku su'aal ku waydiyaan.

Sababtu waxay tahay in aan hubsanno in wax kasta ay hagaagsan yihiin ku saabsan qallinka.

HAB JOOGTO AH AYAA INTA LAGU GUDA JIRO QALLINKA CAAFIMAADKAAGA LOO KORMEERI DOONAA Iyadoo la adeegsanaayo qalabyadaan:

Pulsoxymetri

Oo ah isku-haaye farta la geliyo, wuxuu hab joogto ah u kormeera heerka ogsijinkaa ee dhiigga.

EKG

Oo ah qalabka wadnaha lagu kormeero.



WADNAHA

Waxaa lagu dhejiyaa feeraaha wuxuuna hab joogto ah u kormeeraa.

BLODTRYCKSMANSCHETT OO AH QAYB KAMID AH QALABKA CABBIRAH A DHIIGKARKA

Hab joogto ah ayaan dhiigkarka u kormeeri doonaa, haddii qalliinku u yahay mid gaar ah, waxaan tuubo dhuuban uu irbad leh ku gelin doonaa dhinaca hoose ee curcurka iyadoo lagu abaarinaayo xididdada dhiigga, taasoo hab joogto ah heerka dhiigkarka u cabbiri doonto. Waxaa kaloo lagu gelin doonaa tuubo dhuuban irbad leh oo durugsan (PVK) = oo ka samaysan tuubo blaastik oo dhuuban, taasoo oo aan gelin doono xididda dhiigga ku taallo kilkilsha ama gacanka. Halkaas ayaa dhaawo iyo dhibco laga siin doonaa.

CIRIBTIRIDA DAREENKA IYO/AMA SUUXINTA

Siyaabo kala duwan ayaa dareen-wadeyaasha loo ciribtiri kara ama

daawooyinka suuxinta kala duwan la adeegsan doonaa hadba nooca qalliinka aad samayn doonto. Badi ahaan waxaa la isticmaala ciribtirida dareenka iyo suuxinta ba.

CIRIBTIRIDA DAREENKA DHBARKA

Dhinac ayaa u seexan doontaa ama waxaad fadhisaa doonta geeska sariirta. Waa inaad dhabarkaaga qaloocisaa, sidaa loo wayneeyo inta u dhaxayso ricirada, taasoo sahlin doonto durida.

Takhtarka suuxinta wuxuu dhabarka ku dhaqa daawo dareen qabow leh. Daawada ciribtirida dareenka waxaa lagu buuifiyaa goob u dhaxaysa riciradaha, iyadoo irbad dhuuban la adeegsanaayo. Lugahaaga ma dhaqdhaqaaci kartid wax xannuun ah ma dareemi doontid. Ciribtirida dareenka wuxuu soconayaa laba ilaa shan saacadood. Habka waxaa aad loo adeegsadaa qalliinka jilbaha, misgaha iyo qalliinka xubnaha taranka. Waxaa loo yaqaanno ciribtirida dareenka *spinal*.

NOOCA CIRIBTIRIDA DAREENKA EE LOO YAQAANNO

Epidural waxaa la adeegsadaa qalliinka waawayn dartiisa, sida qalliinka caloosha. Maxaayeelay xannuunkeeda wuxuu jira dhowr maalmood. Inta lagu guda jiro qalliinka waa lagu suuxinayaa, markii aad ka toosta na waxaa lagu siinayaa ciribtirida dareenka ee loo yaqaanno *epidural*. Ciribtirida dareenka noocani ah waxaan ku diyaarinaynaa intii aan lagu seexin kahor iyadoo ciribtirida dareenka maxaliga ah la geliyo tuubo blaastiik ka samaysan oo aad u dhuuban oo leh irbad ri-cyada dheddooda la geliyo. Tuubada blaastikada ka samaysan halkaas ayay isaga jiraysa, taasoo suurtagelin doonto ku shubida daawada ciribtirida dareenka ilaa inta looga baahan yahay, badi ahaan 1-2 maalmood qalliinka kaddib. Hab taxadarsan ayaa loo tijaabiyyaa waxtarka ciribtirida dareenka.

Goorta ciribtirida dareenka dhabarka (ha ahaadeen ciribtirida dareenka nooca *spinal* ama *epidural*) waxaa saamayn ku yeeshaan kaadihaysta, taasoo keenayso inaadan dareemin kaadiyeenta. Sidaas awgeed, badi ahaan waxaan gelinaa kaadihaysta tuubo arrintaas u gaar ah, taasoo kaadihaynta ka soo daadinayso kaadida. Ciribtirida dareenka wuxuu suurtagelin doonaa inaadan waxba dareemin markii kateetarka aan kaadihaysta gelinayno.

Xannuun-dejiye culus iyo daawooyinka walwalka dejiya iyadoo toos dhiigga lagu shubi doonaa markii dhabarka laga duraayo ha ahaadeen ciribtirida dareenka nooca epidural-*spinal* ba, kuwaasoo hoos u dhigi doono raaxo la'aanta soo ifbixi karta.



Ciribtirida dareenka gacanta, garabka ama lugaha Haddii garabka, gacanta ama lugaha laga qalli doono waxaa lagu siin karaa ciribtirida dareenka, taasoo suurtagelin doonto in aadan wax xannuun ah dareemin inta qalliinka u socdo, iyo xitaa dhowr saacadood kaddib markii qallinku u dhamaado. Xaaladaas gacanta ama lugta midna ma dhaqaajin kartid. Taasoo macne-heeda ah in takhtarka suuxinta oo daawada ciribtirida dareenka wuxuu gelin doonaa dareen-wadeyaasha qorta, gumaarka ama bowdada hoosteeda. Waxtarka daawada ciribtirida dareenka waa 10 ilaa 16 saacadood. Xaaladaha badidooda waxaa inta lagu guda jiro qalliinka laysla adeegsada daawada ciribtirida

dareenka iyo suuxinta. Aamaankaaga dartiisa ayaa irbada ciribtidida dareenka lagu duri doonaa intii aan lagu suuxin, laakinse waxaa lagu siin doonaa daawooyinka walwalka dejiya ayaa toos dhiigga lagu shubi doonaa, kuwaasoo hoos u dhigi doono raaxo la'aanta soo ifbixi karta.

SUUXINTA – SEEINTA

Macnaha suuxinta waxaa weeyaan in iyadoo daawooyin kala duwan la adeegsanaayo hab culus lagu seexiyo, taasoo marna suurtagelin doonin inaad wax xannuun ah dareento inta lagu guda jiro qalliinka.

Marka hore waxaad ku neefsan doontaa gaaska ogsijjiin, kaasoo lagu saari doono sanka iyo afkaaga hortiisa.

Anago adeegsanayno PVK tuubada dhuubar irbada leh ee durugsan ayaan waxaan ku siin doonaa daawada hurdada keenta taasoo ku fadhiba gacanta ama xusulka.

Dhown ilbiririgsi gudahooda ayaa ku gamyesaa.

Sidaa aad hurada ku sii wadato inta lagu guda jiro qalliinka waxaa kolba lagu siinayaa daawada suuxinta, iyadoo la adeegsanaayo PVK ama iyadoo aad ku neefsanayaso gaas isku dar ah.

Siyaboo kala duwan waxaan u kormeeri doonaa in aad seexatay iyo inaad sii fiican u hurdayso inta lagu guda jiro qalliinka. Inta lagu guda jiro qalliinka waxaa aagaaga ku sugnaan doono shaqaalaha suuxinta.

QALLIINKA KADDIB

Markii qalliinku dhamaado waxaa la joojinayaa daawada hurdada, kaddib adigoo weli ku sugar qolka qalliinka ayaa lagu toosinayaa. Daawada hurdada waxay sababi kartaa inaadan wax badan ka xasusan toosida. Markaas kaddib waxaa lagugu waareejin doonaa qolka toosinta.

WAAXDA SUUXIN KA TOOSINTA

- Qalliinka kaddib waxaa toos lagu geyn doonaa waaxda ka toosida suuxitaanka.
- Waxaa halkaas lagu kormeeri doonaa EKG, heerka dhiigkarka iyo heerka ogsijjinka isla sida waaxda qalliinka.
- Qalliinka kaddib waxaa lagu siin doonaa gaaska ogsijjinka.

Waxaa mar kasta goobjoog ah shaqaalaha, kuwaasoo ku siin doonaa xannuun-dejiye, cabbitaan iyo daawo labalabada looga hortragoo. Waxaan hubsan doonaa inaad ku waran tahay dhib la'aan.

- Waa muhim inaad na wargeliso haddii xannuun aad dareemayo. Xannuunka si sahlan ayaa wax looga qaban karaa haddii durbaadiiba daawo lagu siiyo.
- Haddii lagu seexiyay inta lagu guda jiro qalliinka, waxaa dhici karto in tuubo qorta lagu geliyay, taasoo neefsashada ka caawini doonto. Taasoo keeni karto dareenka xan-

nuun yar dhinaca dhuunta, sida cod xabeeb iyo sahashan ah. Dhibaa-tooyinkaas oo caadi ahaan ciribtirmaan hal maalin gudaheeda.

- Waaxda ka toosida suuxitaanka suurtagal ma ah in lagugu booqdo, haseyeeshe waxaa suurtagal noqon karto in taleefan lagu soo diro ama adiga aad dirto. Lambarka taleefankaas wuxuu ku qoran yahay warqadda yeeritaanka qalliinka. Waxaan adeegsanaa qalabka *ultrasound* waa haddii aadan kaadiyeen daramayn. Haddii kaadihaysta ay kaadi badan ku jirto waxaan ka caawini doonaa booqashada musqusha. Waa haddii iskaaga aad u kaadiyeey karin, taasoo dhacda, waxaan xaaladaas samayn karnaa kaadi ka soo daadin. Inta lagu guda jiro qalliinka waxaa hab joogto ah loo beddeli doonaa tuubooyinka dhuuduuban ee ah noocyada kala duwan.
- Warbixin xiriir la leh qalliinkii waxaa inta lagu guda jiro xilliga daawaynta ku siin doono takhtarkaaga.

ILAA INTEE AYAA KU SUGNAAN DOONTAA WAAXDA KA TOO-SIDA SUUXITAANKA?

- Waa hadba nooca qalliinka iyo nooca daawooyinka ciribtidida dareenka lagu siiyay.
- Natijjada heerka garaaca wadnaha, heerka dhiigkarka, iyo neefsashada waa in ay noqdaan caadi.

• Haddii lagu siiyay daawada ciribtidida dareenka dhabarka, luqahaaga waa dhaqdhaqaajin kartaa, taasoo noo muujin doonto in daawada ciribtidida dareenka ay heer lagu qanacasan yahay jirkaaga ka baxday.

• Wixii xannuun ah iyo labolabo aad ayaan wax looga qaban doonaa.

• Xaaladaha badidooda waxaan u baahan nahay in aan kormeerno in aad kaadiyeen karto.



Ku soo-
dhowoow
waaxda
qalliinka

SU'AALLO MIYAA NA
WAYDIIN LAHAYD?
Hamigayga wuxuu yahay in
mudada aad waaxda ku sugaran
tahay aan ku dareen siinno
aamaan iyo samaqabid. Sidaas
awgeed, na waydii haddii ay
jirto arrin aad is-waydiinayso.
Haddii ay jirto arrin aadan ku
qanacsanayn, daahid la'aan na
wargeli kaddib waxaan ku da-
daali doonaa sidii aan wax ugu
qaban lahayn.

Haddii ciribtirida dareenka
iyo suuxinta qalliinka kahor
su'aallo ka qabto mar kasta ayaa
nala soo xiriiri kartaa waaxda
horudhaca qalliinka lambarka
taleefanka wuxuu ku yaalla
warqadda yeeritaanka.

QORAAL-WARBIXINEEDKA-
AN WAXAA LAGU TURJU-
MAY LUQOYINKA HOOS
KU XUSAN:

- Af-carabi
- Af-ingriisi
- Af-finish
- Af-bersi
- Af-isbaanish
- Af-soomaali
- Af-tigrigna

Fadlan waaxda aad ka tirsan
tahay la xiriir.

ISBITAALADA GOBOLA GÄVLEBORG SIGAAR LAGUMA CABBO.

Region Gävleborg

Gävle sjukhus

80187 Gävle

026-15 40 00 , vxl

rg@regiongavleborg.se

regiongavleborg.se